# Xeerka Gudigga

# 4.30.040-P

# Xuquuqda Ardayga ee La Xiriirta Baarida Qofka iyo Hantida

## 1. Ujeeddo

Guddiga Waxbarashada waxaa ka go'an inuu joogteeyo jawi dugsi badqab ah iyadoo la ixtiraamayo xuquuqaha asturnaanta ardayda. Ujeedada xeerkaan waa illaalinta iyo kobcinta jawi badqab ah, oo aan carqalad u laheyn waxbarashada oo wax barid iyo waxbarasho wax ku ool ah, si loo joogteeyo jawi dugsi badqab ah, oo loo gaaro ujeedooyinkaan sida waafaqsan sharciga.

Guddiga wuu aqoonsanyahay in arday walba uu yeelanayo xaquuqda asturnaanta dugsiga iyo ixtiraamka qof walboo shaqsi ah, taasoo sidoo kale uu sharci ahaan ku siinayo ardayda dugsiga dadweynaha. Si loo illaaliyo jawiga waxbarashada iyo caafimaadka iyo badqabka ardayda iyo shaqaalaha, saraakiisha dugsiga waxay awood u leeyihiin inay baaris ku sameeyaan ardayda iyo hantida ardayda markii ay saraakiisha dugsiga hayaan shaki macquul ah oo inuu xadgudub sharciga ah jiray, xeerka Degmada, ama sharciga dugsiga ama xeerka, oo sarkaalka uu hayo shaki macquul ah oo in baarista ay soo saareyso cadeynta qaladkaas. Waaladiinta/masuulada waa in la ogeysiiyaa ka dib baarista ardayga ama hantida oo waa in la ogeysiiyaa natiijooyinka baarista.

## 2. Qaab dhismeedka Sinnaanta Jinsiyada iyo Cadaalada Bulshada

Sida waafaqsan Xeerka Sinnaanta Waxbarashada Jinsiyada PPS iyo natiijada qaab Qhismeedka iyo Qorshaha RESJ PPS, PPS waxay qirsantahay dhaqamada u horseedo ka tarjumida ardayda midabka ee edbinta ku jiro. Waan fahamsannahay cunsuriyada nidaamsan iyo dhaqanka oo labadaba ah waxbarashada iyo nidaamka cadaalada dembiyada taasoo keeneyso inay jiraan eexashada tarjumaada shakiga macquulka ah. Sida waafaqsan hamilada iyo qiyamyada PPS, Degmada waxay qaadaneysaa dhaqamada ka hor imaado oo meesha ka saaro eexashada turjumaada shakiga macquulka ah.

## 3. Baarista

Sarkaalka dugsiga ayaa laga yaabaa inuu sameeyo baaris inta lagu jiro maalinta dugsiga iyo inta lagu jiro dhammaan howlaha dugsiga kafaalo qaado sida munaasabadaha ciyaaraha ama riwaayadaha, haddii ay tahay dhismaha ama ay ka baxsantahay. Marka la sameynayo baarista ardayga ama hantida ardayga, sarkaalka dugsiga waa inuu qaadaa tillaabooyin macquul ah oo lagu dhowro asturnaanta iyo sharafta ardayga mar walboo suurtogal ah oo ku dhiirogeliyo ardayga wadashaqeynta

baaris walba.

Dugsiga Degmada ayaa siiso ardayda aagaga keydka, sida sanduuqyada, miisaska, iyo meelaha la midka ah iyo sidoo kale waxay siisaa ardayda tejnoolijiyada qaar, softaweerka, iyo helitaanka intarneetka (si wadajir ah, "Dhismaha Degmada"). Ardayda ma lahan rajada asturnaanta ee Dhismaha Dugsiga. Saraakiisha dugsiga waxaa loo ogolyahay inay baaraan Dhismaha Degmada ama hanti aan ardayga aheyn sida loogu baahdo iyo iyadoon jirin shaki macquul ah, ogolaanshaha ardayga/waalidka/masuulka, ama ogeysiinta. Waxaa sidoo kale loo ogolyahay inay baaraan sheyada aan la aqoonsan ee laga helay dhismaha PPS iyadoon jirin shaki macquul ah.

Ardayda iyo waaladiinta/masuulada waa in la soo ogeysiiyaa xeerka Degmada ee la xiriiro baarista iyo la wareegida alaabaha diyaarka loo heli karo, sida Buug yaraha Ardayga [insert link].
Ardayda iyo waalidiinta/masuulada ayaa sidoo kale la soo ogeysiinayaa habraacyada cabashada ee iyaga loo heli karo.

**4. Ogeysiinta Waalidka/Masuulka**

Waalidiinta/masuulada waa in sidoo kale la soo ogeysiiyaa oo waa inay ku bixiyaan ogolaansho ka hor inta aysan fullinta sharciga sameynin wareysiga ardayga ee ah qofka baaritaanka ku marayo Dhismooyinka Degmada. Waaladiinta/masuulada marqaatiyada ama dhibanayaasha imaan karo waa in sidoo kale la ogeysiiyaa ka hor inta aysan saraakiisha fulinta sharciga ku sameynin wareysi dhismaha Dugsiga, in kastoo maamulayaasha laga yaabo inay si degdeg ah ku sameeyaan ka dhaafid halkaasoo ogeysiintaan ay ka joojin karto ardayga ah dhibbanaha dembiga ee wargelinta. Sida waafaqsan sharciga Oregon, waaladiinta/masuulada ayaa laga yaabaa inaan la soo ogeysiin markii canuga loo wareysanayo sida dhibane laga shakiyay ee canuga lagu xadgudbay. Xaaladaha halka ay ka jiraan qatar ku aadan badqabka iyo amniga, waxaa laga yaabaa inaysan jirin fursad lagu ogeysiiyo waaladiinta ka hor faragelinta sharciga fulinta. Sharci ahaan, maamulayaasha dugsiga ma faragelin karaan xariga ardayda.

**5. Nidaamka raadraaca**

Degmada waxay sameyneysaa nidaamkaraadraaca oo waxay sannad walba ku soo wargelineysaa natiijooyinkooda Guddiga. Si loogu hoggaansamo Xeerka Sinnaanta Waxbarashada Jinsiga PPS si meesha looga saaro isku dheelitirnaan la'aanta jinsiyada ee edbinta, nidaamka raadraaca waa inuu ku jiraa warbixinta tirakoobka ee baaritaanada lagu sameeyo dugsi walba, sheyga baarista, iyo tilmaamayaasha kale

kuwaasoo gacan ka geysanayo aqoonsashada, falanqeynta, oo kormeero kala duwanaanshaha.

**6. Nidaamka**

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka ee ay saraakiisha dugsiga laga yaabo inay sameeyaan baaris ama la wareegida ardayda ama hantidooda, nooca iyo noocyada hantida la mamnuucay, iyo sharaxaadaha kale ee ku saabsan hirgelinta xeerkaan, fadlan arag Jiheynta Maamulka quseeyo.

**7. Qeexitaano**

a. **Shakiga macquulka ah** waa heerka cadeynta ku saleysan xaqiiqo gaar ah oo la qeexi karo, sidoo kale sida gabagabada macquulka ah ee laga soo saari karo xaqiiqooyinkaas. Tusaalooyinka shakiga macquulka ah waxaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xadidneyn, indha indheynta goobjoogayaasha ee shaqaalaha dugsiga; warbixinta ka timid ilaha loo arko kuwa lagu kalsoonyahay; urta la aqoonsan karo ee alkulada, tubaakada, ama xashiishka; ama dabeecad kaloo aan caadi aheyn.

b. **Wareysiga fullinta sharciga** waxaa loola jeedaa su'aalo weydiinta ula kaca ah ee ardayga markii ardayga uu dareemo inuusan ka tagin qolka ama uu ka baxo wada hadalka. Ardayda raadineysa oo kala qeybgaleyso wada sheekeysiga fullinta sharciga inta lagu jiro xaalada maalinka dugsiga ma ahan wareysi.

c. **Waalidka/Masuulka** waa qofka lagu aqoonsaday diiwaanada dugsiga sida inuu xiriir illaalin la leeyahay ardayga.

d. **Qatarta dhow** waa qatarta degdeg ah oo dhaawaca halista ah ee jireed ama dhimashada ee shaqsiga ama dadka kale.

e. **Qofka Baaritaanka** waa qofka dhaqankiisa dhalinayo shakiga in qofka laga yaabo inuu ka qeybgalay fal sharci daro ah.

Tixraacyada Sharciga: ORS 332.075; ORS 419B.010 - 419B.045; OAR 581-021-0050 illaa – 0075; ORS 332.107

Taariikhda: Waxaa la qaatay 8/27/73; La badelay 5/84; 10/25/84; 10/13/88; 10/25/90; 9/9/02; 7/14/2020